



BERGEN  
KOMMUNE

Ku socota: Waalidka/mas'uuliyiinta carruurta  
dhigata iskoollada dawladda ee xaafadda Laksevåg

Tixraacayaga: 2021/186033  
Taariikh: 23-ka febraayo 2022

## Mashruuc tijaabo ah halkaas oo ay guriga iyo iskoollu ku wada xiriirayaan Vigilo

Nidaamka wada xiriirka ee Vigilo isticmaalkiisa ayaa hadda laga billaabay iskoollada xaafaddaada. Laga billaabo maanta iskoollu wuxuu waalidka kula soo xiriirayaa bogga xiriirka waalidka ee Vigilo ama Vigilo app. Iskoollu ay SFO waxay isticmaali doonaan Vigilo marka ay farriimo kuu soo dirayaan oo ay doonayaan in ay warbixin kula wadaagaan. Isticmaalka nidaamka wada xiriirka ee Vigilo wuxuu qayb ka yahay mashruuc tijaabo ah, si joogto ah ayaana loo isticmaali doonaa haddii uu mashruucu u hagaago sidii loogu tala galay.

Hadda ka hor habab kala duwan ayaa waalidka lagula xiriiri jiray sida in ardayda warqad boorsada loo soo geliyo, iimayl iyo SMS. Marka aan hadda u wareegno habka wada xiriirka ee Vigilo waxaa habkaasi noqonayaa hab lagu wada xiriiro oo adiga waalidka/mas'uulka ilmaha ah iyo shaqaalaha kuwii hore uga ammaan badan uguna waxtar badan.

### Maxaan u isticmaalnaa Vigilo?

Vigilo waxaa loo isticmaalaa in aad adiga iyo iskoollu warbixinta ku kala qaadataan. Vigilo ayaad iskoollu farriimaha ugu diraysaa, ugu sheegaysaa maqnaashaha – halkaas ayaad na ka helaysaa waxyaalo iskoollu uu ku soo daabaco. Iskoolluuna sidoo kale ayuu farriimo kuugu soo dirayaa Vigilo, kuna soo daabici doonaa warbixin adiga kugu socota.

Macluumaadka xasaasiga ah lagu diri maayo Vigilo. Waxaa kuwaas ka mid ah macluumaadka caafimaadka, diinta, kiisaska qof la dhibay iyo dhaqaalaha shakhsiga. Xiriirrada arrimahaas ku saabsan waxaad isticmaalaysaa foomka xiriirka ee bogga internetka ee iskoollu ama iskoollu ayaad telefoon u soo diraysaa.

Warbixin intaan ka badan oo ku saabsan sida aad iskoollu ula soo xiriirayso adiga oo Vigilo isticmaalaya iyo sida Vigilo u xafido macluumaadka qofka, waxaad ka helaysaa bogga internetka ee degmada Bergen [innbyggerhjelpen](#).

### Carruur ma kuu dhigataa SFO?

Iskoollu iyo SFO way ku kala duwan yihiin Vigilo. Sidaas darteed marka uu ilmuhu maqan yahay waa in aad laba farriin oo kala duwan maqnaashahaas ka dirtaa, mid waxaad u diraysaa iskoollu midna waxaad u diraysaa SFO.

### Sidee ayaan u billaabaa isticmaalka?

Waxaad Vigilo ka geli kartaa [logge inn](#) bogga waalidka adiga oo isticmaalaya kombiyuutar, Chromebook ama kombiyuutarrada gacanta [nettbrett].

App-ka Vigilo ayaad kula soo degi kartaa telefoonnada gacanta ee casriga ah ama kombiyuutarka gacanta, waxaad na kala soo degi kartaa App Store, Google Play ama AppGallery.

Ayada oo ammaanka laga taxaddarayo ayaa waxaa lagaaga baahan yahay in aad ID-porten isticmaasho marka aad Vigilo gelayso. Shaqaalaha iskoollada laftigoodu hab ammaan ah ayay Vigilo ku galaan marka ay nidaamka isticmaalayaan.

### **Caawin ma u baahan tahay?**

Haddii aad caawin u baahan tahay ama aad doonayso in aad farriin noo soo gudbiso La soo xiriir [Adeegga dadweynaha degmada Bergen](mailto:innbyggjerservice@bergen.kommune.no).

limayl: [innbyggjerservice@bergen.kommune.no](mailto:innbyggjerservice@bergen.kommune.no)

Telefoon: 55 56 55 56

Faahfaahinta isticmaalka: [Xarunta caawinta Vigilo ee iskoollada](#)

Mahadsanidiin

#### ***Marius Arnason Bøe***

Agaasime degmo  
Waaxda golaha deegaanka ee  
xannaanooyinka carruuraha,  
iskoollada iyo ciyaaraha

#### ***Are Andreassen***

Madaxa qaybta, maammulka iyo dhigitaalka  
Waaxda golaha deegaanka ee xannaanada carruurta,  
iskoollada iyo ciyaaraha